

# Ku soo dhawoow waxbarasho-horaadka - macluumaad waalidiinta ku socda oo khuseeya waxbarasho horaadka

Ilmo kastaa wuxuu waxbarasho horaadka ka qaybqaadanayaa hal sano kahor intaanu bilaabin mas'uuliyadda waxbarashada. Bisha Agoosto ee 2024 waxaa waxbarasho-horaadka bilaabaya sida caadiga ah carruurta dhalatay 2018-ka. Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadood maalintii oo u dhaxeeya 8.30–13.30 oo ah inta lagu jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Waxbarasho-horaadka Helsinki waxaa la qabanqaabiyaa iyadoo adeeg degmadu bixiso ah iyo iyadoo adeeg shirkado gaar ah bixiyaanba ah.

Barbaarin-horaadka lagu buuxinayo waxbarasho-horaadku wuxuu soconayaa isagoo lee'eg isla intii uu leekaa intaanu bilaabanin waxbarasho-horaadku, haddii aanad wax isbaddal ah ugu baahnayn. Barbaarin-horaadka la buuxinayo waxaa lagu qabanqaabinayaa guud ahaan isla goobta iyo kooxda ilmuhu uu ku helayo waxbarasho-horaadka.



## Carruurta ku jira barbaarin-horaadka degmadu bixiso

Barbaarin-horaadka degmadu bixiso ilmaha ku jira waalidkii markaad tahay waxaad booska waxbarasho-horaadka ku diidaysaa ama ku qaabilaysaa nidaamka adeegga ee Asti muddada u dhaxeysa **14.2.–29.2.2024**. Boosaska waxbarasho-horaadka waxaa lagu qaabilayaa cinwaanada qofka u shaqaynaya **21.1.2024**. Boosaska waxbarasho-horaadka ah ee la aqbalay go'aamadoodu waxaay soo galayaan **29.3.2024** adeegga suomi.fi. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaad ka helaysaa [hel.fi/esiopetus](https://hel.fi/esiopetus).

Boosaska waxbarasho-horaadka waxaa ilmaha lagu siiyaa cinwaankiisa guriga nawaaxiga lagu salleeyo ee ardayda laga qaato iyadoo qiimeyn gaar ah la siinayo dugsiga u dhow cinwaanka guriga ardeyga. Waxaa sidoo kale ilmaha looga soo jeedin karaa booska waxbarasho-horaadka meel kale oo aanan ahayn nawaaxiga cinwaanka guriga ardeyga u dhow haddii uu ilmuhu qabo baahi gaar ah oo taageero, inuu u baahanyahay barista luqadda iswidhishka ama haddii uu u baahanyahay xanaaneynta gallimada kala duwan.

## Barbaarin-horaadka gaarka ah, waxqabadka kooxaha ama xanaaneynta guriga carruurta ku jira

Barbaarin-horaadka gaarka ah, waxqabadka kooxaha ee magaaladu qabanqaabiso ama daryeelka guriga carruurta ku jira waalidkood waa inay ilmahooda ka soo diiwaangaliyaan waxbarasho-horaadka degmada ee nidaamka adeegga Asti muddada u dhaxeysa **8.–21.1.2024**. Boosaska waxbarasho-horaadka waxaa lagu qaabilayaa cinwaanada qofka u shaqaynaya **21.1.2024**. Boosaska waxbarasho-horaadka ah ee la aqbalay go'aamadoodu waxaay soo galayaan **29.3.2024** adeegga suomi.fi.

## Waxbarasho-horaadka lagu qabanqaabinayo xanaanooyinka gaar loo leeyahay

Waxbarasho-horaadka xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay toos ayaa xannaano-maalmeedka loogu codsanayaa foomka codsiga ([hel.fi/esiopetus](https://hel.fi/esiopetus)). Goorta la codsanayo waxbarasho-horaadka gaarka ah waa muddada u dhaxeysa **8.–21.1.2024**. Go'aamada waxbarasho-horaadka waxaa boosto ahaan waalidiinta loogu dirayaa bilaha febraayo illaa maarso ee 2024.